

Xarunta Garsoorka Ee Caruurta Iyo Qoysaska Ee Judge Patricia H. Clark

Xarunta Garsoorka Ee Caruurta Iyo Qoysaska ee Judge Patricia H. Clark waxa ay xarun u tahay Maxkamadaha Caruurta, Xabsiga Caruurta, iyo barnaamijyada kala duwan ee la xiriira. Waxa ay ku taalaa xaafadda First Hill, inta u dhaxeysa wadooyinka 12aad iyo 14aad, hal looto dhinaca bariga ee wadada Jefferson, qiyaastii shan looto bariga Xarunta Caafimaadka ee Harborview ee Seattle.

Cinwaanka Dhismaha:

1211 East Alder Street
Seattle, WA 98122-5593

Maalmaha iyo Saacadaha Shaqada:

Isniin-Jimcaha, 8:30 aroornimo-4:30 galabnimo.

Maalmaha iyo Saacadaha Dhismaha la geli karo:

Isniin-Jimcaha, 7:00 aroornimo-5:00 galabnimo.



- [Fasaxyada Iyo Maalmaha Aanay Maxkamaddu Shaqeyneyn](#)

Sidee lagu tagaa halkaas [KHARIIDAD](#)

- [Khadka Baska](#)
- [Gaari aad wadato](#) (Mareegta Google Maps.)

Macluumaadka Goobaha Gaadiidka La Dhigto

Goob gaadiidka la dhigto oo laag la'aan ah waxa aad ka heleysaan Xarunta Garsoorka Ee Caruurta Iyo Qoysaska Ee Judge Patricia H. Clark Children iyo Booqashada. Goobaha gaadiidka la dhigto waxaa laga soo galaa dhinaca Maxkamadda ee Bariga Remington. Sidoo kale, waxaa la dhigan karaa laba saac oo lacag la'aan ah kuna yaalaa CFJC. Akhri xog dheeraad ah oo ku saabsan [khariidada goobaha gaadiidka la dhigto](#).

Goobaha la dhigto Bushkuleetiyada

Bushkuleetiyada waxaa ladhigan karaa afaafka hore ee CFCJ. Goobta la dhigto bushkuleetiyada waxa ay ku taalaa dhinaca hoose ee wadada lagu socdo, albaabaada laga soo galo ee xiga koonfurta.

Fududeynta Loo Fidiyo Dadka Naafada Ah

Haddii aad naafo tahay, fadlan buuxi foomka [Codsiga U Fududeynta](#). Xarunta Garsoorka Ee Caruurta Iyo Qoysaska ee Judge Patricia H. Clark waxa ay ka soo baxday shuruudaha u degsan Sharciga Dadka Naafada Ah Ee Mareykanka (ADA).

Baaritaanka Gelidda Dhismaha

Maxkamaddani waxa ay leedahay goob lagu baaro dadka galaya. Alaabadana [lama ogola in lala galo Dhismayaasha Maxkamadaha King County](#). Ka daawo halkan [fiidiyoow](#) faahfaahinaya baaritaanka amaanka ee la xiriira gelitaanka dhismaha maxkamadda.

Goobta Caruurta Lagu Hayo

Dhawaanta ayaa laga furayaa Xarunta Garsoorka Ee Caruurta Iyo Qoysaska ee Judge Patricia H. Clark.

Cuntada

Meel looga lugeyn karo Adiga oo u dhaqaaqaya wadada 12aad, inta u dhaxeysa Bariga Wadada Jefferson iyo Madison, waxaa jira maqaayado fara badan iyo biibitooyin, qaarkoodna ay ku yaalaan ka soo horjeedka Jaamacadda Seattle. Isbitaalka Swiidhanka - Cherry Gill, ee ku yaala Bariga Jefferson ee wadada 16aad, waxaa ku yaala maqaayad weyn.